



Axmed Guuleed

waxa uu qaadanayaa suuxin

Sheeko loogu talagalay carruurta yaryar oo ku saabsan qaadashada suuxinta



Ka akhri talooyinka loogu talagalay waalidiinta bogga dambe

Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin



Salaan, waxaan ahay Axmed


Toddobaadkii hore waxa la igu suuxiyay isbitaalka.

Suuxdintu waa marka uu dhakhtar ku siiyo daawo si aadan u dareemin, u maqlin ama aadan u arkin shay inta lagu jiro baaritaanka ama qaliinka. Waxay u yara eg tahay hurdo aad u qoto dheer.

Dhakhtarku wuxuu ku siinayaa daawada suuxinta ilaa inta aad u baahan tahay, marka ay joojiyaan suuxintana waad soo toosaysaa.


Ma kuu sheegaa siday ii ahayd aniga?

Ma iga caawin kartaa inaan Zoe the zebra, boombalaha
aan ugu jeclahay, ka helo bog kasta?



Diyaar garowga

Way fiicantahay haddii aad dhawr shay horay ugu sii
qaadato isbitaalka. Waxa aan horay u sii qaatay qaar ka mid
ah dharka hurdada, cadaygayga, buug iyo boombalada aan
jeclaa.



Cunto la'aan

Waa inaadan wax cunto ah ku jirin calooshaada marka
lagu suuxinaayo, markaa ma awoodi karin in aan wax cuno.
Waxaan cabbay biyo si aanan u dareemin haraad badan.

Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin



La kulanka kalkaalisa

isbitaalka gudihiisa, **kalkaaliso** caafimaad ayaa miisaan igu miisaamtay si ay dhakhaatiirtu u ogaadaan inta daawa ah ee ay hadhow i siin doonaan.

Kalkaalisu waxay hubisay heerkulkayga, waxayna i siisay gunti magaca lagu qoraayo oo gacanta lagu xerto si ay qof walba ugu sheegto inaan ahay **Axmedes Guuleed**.



Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin

Noocyada kala duwan ee suuxinta

Waxaan la kulmay **dhakhtarkayga suuxiyaha**. Kaasi waa dakhtarkii i daryeelayay markii aan suuxinta maraayay. Suuxinta waxaa lagu bilaabi karaa tuubo yar oo gacantaada lagu xiriiriyo ama maaskaro. Waxaan ka wada hadalnay habka iigu fiican aniga.

Waxaad gacmahaaga marin kartaa kareem si aad uga joojiso tuubada yar inay ku dareensiiso xanuun badan. Daawada suuxinta waxay gashaa tuubada yar waxayna u shaqeysaa si degdeg ah runtii.





Maaskarada ayaa u uraysa sida qalimaanta wax lagu calaamadeeyo, waxayna qaadataa xoogaa waqtii dheer in ay shaqo bilawdo. Weli waxaad u baahan tahay tuubo yar oo gacantaada ah maaskarada ka dib haddii ay dhacdo inaad u baahato daawooyin badan hadhow, laakiin waxba ma dareemi kartid maaskarada ka dib.



Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin



Waqti ku dhow qalliinka

Waxa aan helay wakhti aan ku ciyaaro qaliinka ka hor. Kalkaalisadayda ayaa iga codsatay inaan xirto goonnada isbitaalka. Carruurta qaarkood waxay xirnaayeen dhar hurdo.

Waxa laga yaabaa in xoogaa dawo ah lagugu siiyo waarka.
Tani waxay noqon kartaa inay kaa joojiso inaad dareento
xanuun qalliinka ka dib ama inay kaa caawiso inaad dareento
hurdo qalliinka ka hor.




Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin



Qolka suuxdinta

Qolka suuxinta waxaa yaalay mashiinno loo yaqaan **kormeerayaal** si ay iila socdaan mar walba. Mid ka mid ah waalidkay ayaa ii raaci karayay qolka.

Dabadeed markii aan
hurday waalidkay ayaa
i sugayay. Waan ogaa
inaysan fogayn.



Inta aan qalliinka ku jiro

Waxba ma xasuusto, laakiin dhakhtarkeyga suuxdinta
wuu ila joogi jiray mar kasta. Way i daryeeleen oo isiiyean
daawada suuxinta.

Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin




Qolka bogsashada

Markii qaliinka la iga dhameeyay, dhakhtarka suuxinta ayaa damiyay daawada suuxinta si aan u soo tooso. Kalkaaliye ayaa igu ilaalinaysay qolka raysashada ilaa ay waalidkay ila joogi kareen.

Waxaan dareemay xanuun yar markii hore. Kalkaalisaadu waxay isla markiiba i siisay xoogaa dawo ah, isla markiiba waxaan dareemay fiicnaan.



Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin




Dareemista gaajo

Markii aan bilaabay inaan mar kale gaajo dareemo,
kalkaalisada ayaa ii ogolaatay wax aan cuno oo aan cabbo.

Taasi waxay i dareensiisay fiicnaan.

Joogista isbitaalka

Waxaan u baahday inaan isbitaal ku jiro hal habeen.
Mid ka mid ah waalidkay wuu ila joogi karaa.



Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin



Waqtiga aad guriga ku tagi lahayd

Qof kasta oo isbitaalka joogay aad buu u naxariis badnaa, laakiin waan ku farxay markii la gaaray wakhtigii aan guriga aadi lahaa.

Ma jeelaan lahayd inaad midabeyso sawirkayga?

Nabadgelyo!




Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin

Waa kuma waa maxay



dhakhtarka suuxinta

Dhakhtarka ku siinaya daawada suuxinta, ka dibna ku ilaalinaya ilaa ay ka gaarayso wakhtiga aad mar kale soo toosi lahayd.



Kalkaliyayaasha

Dadka ku daryeela marka lagu qalayo.




Qof ku takhasusay cayaaraha

Qof isbitaalka jooga oo kugu caawiya inaad ciyaarto oo fahmo waxa kugu dhacaya. Isbitaalada oo dhan ma wada laha khabiiro cayaaraha ku takhasusay.



Dhakaatiirta waaxda hawlgelinta (ODPs) iyo kalkaliyayaasha tiyaatarka

Dadka ka caawiya dhakhtarka suuxinta inuu ku xanaaneeyo marka aad qaadaneyso suuxdin.





Tiyaatarka

Qol ku yaal isbitaal oo qaliin lagu sameeyo. Wax walba aad bay nadiif u yihiin, dadka ka shaqeeyana waxay xirtaan dhar ay ka mid yihiin bajamas iyo koofiyado u ilaaliyo nadaafadda timahooda.

Mashiinka kormeerka

Mashiin uu dhahtarka suuxinta isticmaalo si uu isha ugu hayo marka aad qaadaneyso suuxinta. Wuxuu aadeegsadaa qaar ka mid ah dhajiyeyaa lagu dhajinaayo laabtaada iyo biin lagu dhajinaayo fartaada si uu u hubiyo xawaaraha wadnahaagu u garaacayo iyo sida fiican ee aad u neefsanayso.



Qolka soo kabashada ama qaybta daryeelka suuxinta kadib (PACU)

Qolka ay carruurtu ka toosaan suuxinta ka dib.

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama wakasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto koxoda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tiixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan [halkaan](#) riix.

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah) bulshada turjubaanka. fTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadheha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.



Axmed Guuleed uu qaadanayaa suuxin

Sida loo isticmaalo buug-yaraahan

Macluumaadka waalidka

Waxa aenu kuugu diyaarinay buug-yarahahan inaad la akhriso ilmahaaga oo aad ka caawiso inay u diyaargaroobaan suuxintooda. Waxay soo bandhigaysaa waxyabaha laga yaabo dadka qaar ka mid ah inay la kulmaan iyo qaar ka mid ah waxyabaha dhici kara. Waa xaaqo bedeli kartaa qofka ama dadka sawirada ku jira qof kasta oo ilmahaaga la tagi doona isbitaalka sababtoo ah tani way ku kala duwanaan doonaan qoysaska. U sharax ilmahaaga sababta aad u akhrinayso sheekadan. Waa muhiim in la ogaado sheekadu waxay uga dhigan tahay iyo in la eego haddii ay wax su'aalo ah qabaan.

Waxay ku caawin kartaa inaad u ogolaato ilmahaaga inuu ka qeyb qaato sheekada oo uu wax ka qabto welwel kasta oo laga yaabo inay qabaan iyagoo isticmaalaya boombalr aen ku cusbeyn. Carruurta qaarkood ayaa laga yaabaa inay doortaan inay sawiraan dareenkooda.

Haddii ilmahaagu ka weyn yahay saddex sano, waa xaaqo kugula talineynaa inaad diyaariso usbuu ka horreeya suuxinta. Carruurta da'doodu ka yar tahay saddex sano, waa xaaqo kugula talineynaa inaad diyaariso maalinta ka hor imaanshaha isbitaalka. Si kastaba ha ahaatee, fadlan tiixgeli fahamka ilmahaaga.

Noo sheeg waxay kula tahay

Waxaan ku soo dhawaynaynaa taloo yinka lagu hagaajinayo buug-yarahanta. Haddii aad haysid wax faalin ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ugu soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

Kulliyadda Boqortooyada ee dhakhaatiirta Suuxdinta

Churchill House
35 Red Lion Square
London WC1R 4SG
020 7092 1500

rcoa.ac.uk



Daabacaadii Afaraad, Abriil 2023

Buug-yarahahan waxaa dib loo eegi doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

© 2023 Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta Suuxinta iyo Ururka Dhakhaatiirta Suuxinta ee Carruurta ee Boqortooyada Britain iyo Ireland

Buug-yarahahan waxaa laga bixin karaa nuql oo ay ujeedada tahay soo saarista macluumaadka bukaanka. Fadlan xus halka aad ka soo xigatay. Haddii aad dooneyso in aad ku isticmaasho qayb ka mid ah buug-yarahahan daabacaad kale, waa in aad ku muujisaa qaybtii horudhaca astaamaha, sumadaha iyo sawirrada aad ka reebtay. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir.

Sawirada waxaa leh Amanda Lillywhite